

Warside bille ah oo ay soo saarto hay'adda Gargaarka Africa 'ARC'

(8PAGE) WEDNESDAY ,2 December 2022 Jumada Al-Awwal, 1444, Hargeisa-Somaliland



Mac-Hadka Farsamada Gacanta Ayaa Maamuusay Shaqaalihiisa

ARC Ayaa Bil Gudaheed 7 Ceel Ka
Qodday Deegaanno Kala Duwan

ARC Oo Xadhigga Ka Jartay
Masaajiddo Ay Ka
Dhistay Somaliland

ARC Oo Hirgelisay Ceel-Riig
Waraabinaya Dad Ka
Badan 1200 Oo Qof

Cisbitaalka Caalamiga Ah Ee
Hargeysa Oo Heshiis Muhiim Ah
La Galay Jaamacadda Hargeysa



ARC Oo Xadhigga Ka Jartay
Xarumo Lagu Baranayo
Xiftiga Qur'aanka

Mac-Hadka Farsamada Gacanta Kuweytiga Oo Loo Aqoonsaday Mac-Hadka Ugu Fiican Somaliland, Ayaa Maamuusay Shaqaalihiisa



Mac-hadka Farsamada Gacanta ee xarunta Kuweytiga magaalada Hargeysa ayaa munaasabad maamuusid ah u qabtay dhammaan shaqaalaha ka hawlgala, taas oo jawaab u ahayd guusha uu mac-hadku gaadhay ee uu ku mutaystay in xukuumadda Somaliland ay u aqoonsato Mac-hadka Farsamada Gacanta ee ugu wanaagsan dalka. 44 ka mid ah hawladeennada Mac-hadka farsamada gacanta ee qaybta wiilasha, sagaal ka tirsan masuuliyiinta iyo hawladeennada mac-hadka farsamada gacanta iyo xirfadaha ee Hablaha iyo 11 ka mid ah shaqaalaha iyo masuuliyiinta qaybta maamulka ee ARC, ayaa la guddoonsiiyey shahaado sharaf iyo hadyado ay hay'adda ugu talagashay in ay uga mahadnaqdo hawsha fiican ee ay qabteen, kuna dhiirrigeliso joogtaynteeda.

Mudane Ciid Cabdalladiif, agaa-simaha waaxda waxbarashada ee ARC oo munaasabadda furay ayaa mahadnaqa Alle kaddib, waxa uu bogaadiyey kaalinta sare ee uu gaadhay mac-hadku. Isaga oo macallimiinta, masuuliyiinta iyo guud ahaan hawladeennada mac-hadka kula dardaarmay in ay dadaal geliyaan in heerkaas kor looga sii socdo, lana ilaaliyo in guushani ay waarto.

Mudane Khaalid Alcusmaan, kormeerka guud ee waaxda Afrika u qaabilsan hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA – Kuweyt oo Khaadka maqal iyo muuqaalka ah xafadda kaga qaybgalay, ayaa isaguna hambalyo iyo mahadnaq isugu daray mac-hadka Farsamada Gacanta iyo dhammaan dadka ka hawlgala ee sababta u noqday in guushan uu gaadho. Waxa aanu kula dardaaray in la sii wado dadaalka, laguna fara adaygo sidii aan hoos looga soo noqon lahayn kaalintaas sharaf ee la gaadhay oo ay sida oo kale ku faanayso hay'adda ALRAXMA ee ay wakii-lka ka tahay hay'adda ARC.

Maareeyaha Mac-hadka Farsamada Gacanta, Mudane Xuseen Mutawalli oo isaguna munaasabaddan ka hadlay ayaa muujiyey dareenkiisa farxadeed ee ku aaddan in Somaliland ay mac-hadka u aqoonsato mac-hadka ugu taya-da iyo waxbarashada fiican farsamada gacanta ee dalka oo dhan. Waxa aanu hoosta ka xariiqay in guushaasi ay ku timid dadaalka dhammaan halwadeennada kala duwan ee mac-hadka guud ahaan iyo guud ahaan hay'ada ARC, gaar ahaan intooda munaasabaddan lagu maamuusayey.

Waxa kale oo uu mudane Mutawalli ka sheekeeyey waxqabadka iyo

guulaha uu mac-hadku gaadhay tan iyo markii la aasaasay sannadkii 2015 kii, isaga oo muddadaas ay ka qalinjebiyeen 30 arday. Sida oo kalana kaalin weyn ka qaatay wacyiga bulshada ee Barashada farsamada gacanta, waxa aanu ka sheekeeyey qisas kala duwan oo ka warramaya guulaha iyo isbeddelka nololeed ee ay gaadheen qaar ka mid ah ardaydii mac-hadkani soo saaray.

Dr. Cabdiraxmaan Almucallmi, guddoomiyaha guud ee hay'adda ARC oo xafaddan soo xidhay ayaa ka warramay siyaasadaha iyo qorsheyaasha hay'adda ARC oo uu machadku hoos tago, iyo himiladeeda ku aaddan hawlaha samafalka ee ay dalka ka qabato.

Dhinaca kalana waxa uu ammaan iyo bogaadin u jeediyey maamulka iyo hawladeennada mac-hadka farsamada gacanta ee dadaalkoodu uu magacan iyo sumcaddan fiican u soo jiiday mac-hadka.

Madaxweyne ku xigeenka Somaliland ayaa 18 kii Oktoobar 2022 ka, waxa uu mac-hadka Farsamada Gacanta ee Kuweytiga guddoonsiiyey shahaado sharaf ay xukuumadda Somaliland ugu aqoonsatay mac-hadka farsamada gacanta ee ugu wanaagsan Somaliland.



Guddoomiyaha ARC Oo Booqasho Shaqo Ku Tegey Magaalada Burco



Guddoomiyaha hay'adda Gargaarka Afrika, Dr. Cabdiraxmaan Mucallimu ayaa booqasho shaqo ku tegey magaalada Burco ee xarunta gobalka Togdheer. Booqashadan oo qayb ka ahayd Socdaallada ay guddoomiyaha iyo masuuliyiinta kala duwan ee hay'addu ku tagaan xarumaha iyo laamaha kala duwan ee goballada, si ay xogogaal ugu noqdaan mashaariicda iyo hawlaha kala duwan ee ARC ay ka waddo.

Dr. Cabdiraxmaan Mucallimu waxa uu u kuurgalay habsami u socodka hawlaha xafiiska gobalka Togdheer, isaga oo kulamo la qatay xubnaha fulinta ee xafiiska. Waxa aanu ka dhegeystay warbixino la xidhiidha habsami u socodka mashaariicda dhisme, bulsho iyo samafal ee ka socda gobalka. Guddoomiyuhu waxa uu soo maray dhammaan qaybaha kala duwan ee xafiiska iyo mashaari-

icda, kuwaas oo ay ka mid yihiin waxbarashada ee Daaru-xannaan. Guddoomiyuhu waxa uu xadhigga ka jaray qaybta hoyga oo qaadaysa 96 arday oo ah agoonta loogu talagalay in ay wax ka bartaan.

Masuuliyiinta xarunta ayaa guddoomiyaha uga warbixiyeey dhismaha lagu kordhinayo xarunta Daaru-xannaan iyo dhismaha dugsiga sare oo qorshuhu yahay in la furo sannadka foodda innagu soo haya ee 2023 ka. Waxa kale oo ay guddoomiyaha iyo masuuliyiinta xafiiska Muqdisho ka wada hadleen qorshayaasha hawleed ee ay u socdaan, iyada oo uu guddoomiyuhu bogaadiyey shaqada wanaagsan ee ay wadaan. Waxa aanu ku boorriyey sii wadista shaqada iyo muhiimadda uu iskaashigu u leeyahay hawshan ay wadaan. Xarunta waxbarashada Daa-



ru-xannaan waxa ay ka koobantahay dugsi waxbarasho oo ka kooban 240 arday wiilal iyo gabdho ah, xafiisyada maamulka, Shaybaadh, iyo qaybta loogu talagalay hoyga. Waxa kale oo ka mid ah Masaajid qaadi kara 450 qof, dhismaha maamulka, dhismaha adeegyada, ceel riig Joogga uu godanyahay yahay 220 mitir iyo Rugta biyo sifaynta. Xaruntan oo ku fadhida dhul Bedkiisu dhanyahay 10 kun oo mitir labajibbaaran, si casriyana u qalabaysan ujeeddoyinkeeda shaqo waxaa ka mid ah in kor loo qaado heerka waxbarasho ee magaalada iyo guud ahaanba gobalka. Waxa aanay ka mid tahay mashaariicda dhisme ee waaweyn ee ay maalgeliso hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA oo soo marisa hay'adda Gargaarka Afrika ee wakiilka uga ah Somaliland iyo guud ahaan deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.



ARC Oo 200 Oo arday U Bilowday Tababarka Farsamada Gacanta Oo Bilaash Ah



Barnaamij tababarka farsamada gacanta iyo xirfadaha oo ay ka faa'idaysanayaan 200 oo dhalinyaro ah, ayaa ka bilowday mac-hadyada farsamada gacanta ee xarumaha waxbarashada Kuweytiga, magaalooyinka Boorama iyo Hargeysa.

25 arday ayaa uu tababar-kani uga bilowday xarunta waxbarashada ee magaalada Boorama, 75 haween ahna waxa uu tababarka uga bilowday qaybta hablaha ee xarunta xirfadaha gacanta ee Kuweytiga, magaalada Hargeysa. Halka 100 soo hadhay oo wiilal ahaana ay ku biireen mac-hadka farsamada gacanta ee xarunta Kuweytiga isla magaalada Hargeysa.

Qaybaha kala duwan ee ardaydan ayaa la barayaa xirfadaha ay ka mid yihiin, Nijaaradda, Alamuuniyaamta

iyo muraayadaha, Alxanka, korontada iyo tamarta qorraxda, iyo dayactirka iyo Rakibista Qaboojiyeyaasha iyo tallaagadaha. Waxa kale oo iyaguna jira qaybo lagu baranayo Maaraynta Kijada iyo xirfadaha cunto karinta, dawaarka iyo nashqadaynta tolmaha iwm.

Mashruucan ayaa ku yimid heshiis ay hay'adda ARC hore ula saxeexatay wasaaradaha waxbarashada iyo shaqo-gelinta iyo arrimaha bulshada ee Somaliland, waxa aanay ujeedadiisu tahay si loo yareeyo shaqo la'aanta, in dhalinyarada la baro xirfado kala duwan oo ay baahidoodu taallo, si ay suuqa shaqada ugaga xoogsadaan. Mashruuca waxaa maalgelinaysa hay'adda Caalamiga ah ee samafalka Islaamiga ah ee dalka Kuweyt.

ARC Oo Hirgelisay Ceel-Riig Waraabinaya Dad Ka Badan 1200 Oo Qof



Hay'adda ARC ayaa xadhigga ka jartay ceel-riig ay ka hirgelisay deegaanka Jaleelo ee duleedka magaalada Hargeysa, Caasimadda Somaliland. Ceelkan oo loogu magacdaray Mu-niira Sulaymaan Rashid, waxaanq ku rakiban nidaamka biyo soosaarka oo ku shaqaynaya korontada laga dhaliyo tamarta qorraxda. Waxa loogu talagalay in ay biyo lacag la'aan ah ka helaan 200 oo qoys, tiradaas oo qiyaas ahaan u dhiganta 1200 oo qof. Ceelkan oo la qoday joog dhan 40

mitir, waxa la socda kaabayaasha muhiimka u ah oo ay ka mid yihiin kayd biyood qaadaya kun Litir, dar laga dhaansado biyaha nadiifta ah ee la cabbi karo, iyo dararka waraabka xoolaha oo isugu jira geel, adhi iyo lo'.

Dhismaha ceelkan ayaa ka mid ah mashaariicda samafalka ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika, iyada oo gacan ka helaaysa samafalayaal reer Kuweyt ah oo soo mariyey hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA.



ARC Ayaa Bil Gudaheed 7 Ceel Ka Qodday Deegaanno Kala Duwan



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa bishii Noofambar, 7 ceelbiyood ka qoday deegaanno kala duwan oo ka mid ah Soomaaliya.

Ceelashan oo dhammaantood loo dhammaystiray kaabayaasha waraabka ee aasaasiga ah, sida dhismaha daboolka sabadda ah, qalabka biyo soosaarka iyo dararka dadka iyo xooluhu ay ka cabayaan, waxa laga hirgeliyey deegaannada Baydhabo – Koonfur-galbeed, Kismaayo iyo Bulo Mareer – Jubaland, iyo deegaankada magaalada Jowhar ee dawlad gobaleedka Hirshabeelle. Waxa aanay wadar ahaantooda

awood u leeyihiin in ay waraabiyaan illaa 350 qoys oo dadka deegaannadaas ku dhaqan ah, tiradaas oo qiyaas ahaan u dhiganta 2 kun iyo 100 qof.

Qodista ceelashan ayaa qayb ka ah mashaariicda biyaha ee ay hay'adda ARC ka waddo deegaanno kala duwan oo Soomaaliya iyo Somaliland ka mid ah. Kuwaas oo uu yoolkoodu yahay in la xakameeyo, dhibaatooyinka dadka saboolka ah iyo guud ahaan muwaadiniinta ka soo gaadha biyo yaraanta xilliyaada abaaraha oo aanay in badan oo ka mid ahi helin biyo caafimaad ahaan la cabbi karo.



Cisbitaalka Caalamiga Ah Ee Hargeysa Oo Heshiis Muhiim Ah La Galay Jaamacadda Hargeysa

Cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa (HIH) iyo jaamacadda Hargeysa (UOH) ayaa kala saxeexday heshiis iskaashi dhinacyada waxbarashada, tababarrada shaqo iyo adeegyada caafimaadka ah. Maareeyaha cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa, Dr. Yaasir Darwiish iyo Guddoomiyaha Jaamacadda Hargeysa, Dr. Maxamuud Yuusuf Muuse ayaa labada dhinac u saxeexay heshiiskan oo qodobbadiisa ugu muhiimsan ay ka mid yihiin; in cisbitaalku uu tababarro shaqo siiyo ardayda kuliyaadda caafimaadka ee Hargeysa, in dhakhaatiirta takhasuska ah ee cisbitaalku ay tababarro iyo casharro ka bixiyaan jaamacadda, in cisbitaalku uu qiime dhimis boqolkiiba 30 ah si iyo shaqaalaha, iyo ardayda jaamacada Hargeysa ee u soo doonta adeegyada caafimaad ee uu bixiyo. Dhinaca kalana in jaamacadda Hargeysa ay deeq waxbarasho oo sannadka koowaad ah sii-so, 15 ka mid ah ardayda ka qalinjebisa dugsiga sare ee xarunta daryeelka agoonta ee Kuweytiga.

Guddoomiyaha jaamacadda Dr. Maxamuud ayaa soo dhoweeyey heshiiskan iskaashi oo uu sheegay in uu sii xoojinayo wadashaqayn horeba labada dhinac ugu dhexeysay. “Cisbitaalka International, dhakhaatiir farabadan oo waaweyn oo takhasus ah ayaa yimaadda. Jaamacaddana dad badan oo waxbartay ayaa jooga. Badanaana cisbitaallada dalka ka shaqeeya iyo jaamacadda xidhiidh baa ka dhexeeya” ayaa uu yidhi guddoomiye Dr. Maxamuud.

Dr. Yaasir, maareeyaha cisbitaalka International ayaa isaguna ka hadlay muhiimadda heshiiskan uu cisbitaalku la galay jaamacadda.



hiiskan uu cisbitaalku la galay jaamacadda.

Cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa oo si casri ah u qalabaysan, kana hawlgalaan 12 takhasus, waxa uu hoos yimaaddaa hay'adda Gargaarka Afrika oo ka wakiil ah hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA – Kuweyt.

ARC Oo Xadhiga Ka Jartay Xarumo Lagu Baranayo Xiftiga Qur'aanka



Hay'adda Gargaarka Geeska Afrika – ARC ayaa xadhiga ka jartay xarumo loogu talagalay Xiftiga Qur'aanka Kariimka ah iyo waxbarashada dadka da' da dugsiyadu ay dhaafto.

Magaalooyinka Boorama iyo Muqdisho ee Somaliland iyo Soomaaliya ayaa ay hay'addu ka dhistay laba xarun Xifti Qur'aan oo ku fadhiya dhul cabbirkiisu dhanyahay 50 Mitir oo labajibbaaran. Xarun kastaa waxa ay qaadaysaa 50 arday, waxa aanay ka kooban tahay laba fasal. Iyada oo xarun kasta loo dhammaystirtay kaabayaasha lagama maarmaanka ah ee ay ka mid yihiin qalabka waxbarashada, kutubta Qur'aanka laga dhiganayo iyo Suuliyadu.

Xarumahan Xiftiga Qur'aanka Kariimka ah iyo waxbarashada dadka waaweyn oo lagu magacaabo 'Qur'aankaannu Xafidnaa' ayaa uu tirsigoodu noqonayaa Saddexaad oo Boorama laga dhisay iyo Shanaad oo Muqdisho ah, waxa aanay qayb ka yihiin mashruuca dhismaha xarumaha waxbarashada iyo cibaadada.

Xiftinta qur'aanka ayaa ka mid ah barnaamijyada hay'adda ee ka qaybqaadashada waxbarashada iyo in Ubadka lagu barbaariyo Qur'aana Kariimka ah iyo sida oo kale la dagaalanka akhris-qoris la'aanta oo ardayda waxbarashadu dhaaftay loo diyaariyo in la soo gaadhsiiyo faacooda.

Mashruuca dhismaha xarumahan ayaa ka mid ah mashaariicda dhismaha goobaha cibaadada iyo waxbarashada oo ay hay'adda ARC ka fuliso Somaliland, iyada oo kaashanaysa hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA – Kuweyt.




ARC Oo Xadhigga Ka Jartay Masaajiddo Ay Ka Dhistay Somaliland

Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa xadhiga ka jartay laba masaajidka oo ay ka dhistay Somaliland. Masaajidka Asmaa' Bint Abi Baar oo ku fadhiya dhul cabbirkiisu dhanyahay 70 mitir labajibbaaran, halkii marna qaadaya 116 ayaa ay ARC ka dhistay magaalada caasimadda ah ee Hargeysa, halka ay magaalada



ARC Oo Kutubta Qur'aanka Kariimka Ah Ku Qaybisay Hargeysa



Hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ayaa kutubta qur'aanka Kariimka ah u qaybisay Masaajid iyo goobo Qur'aanka Kariimka ah lagu barto oo magaalada Hargeysa ah. Kutubtan Qur'aanka ah ayaa 250 ka mid ah loo qaybiyey ardayda xarunta Daarul-Hudaa ee xiftinta Qur'aanka Kariimka ah oo ku taalla degmada Ga'an Libaax ee magaalada Hargeysa, 200 oo kitaabna waxaa loo qaybiyey ardayda Qur'aanka Kariimka ah lagu xafidsiiyo xarunta Kuweytiga ee magaalada Hargeysa.

Kutub qaybintan ayaa ka mid ahayd mashruuca 'ololaha Alshuruuq' ee qaybinta kutubta Qur'aanka Kariimka ah, kaas oo ay ga'an siiso hay'adad Caalamiga ah ee ALRAXMA Kuweyt. Ujeedadiisuan waa in muslimka lagu baraarujiyo muhiimadda uu Qur'aanku ku leeyahay qalbiga muslimiinta iyo sida aan looga maarmayn in qof kasta oo muslim ahi uu xoojiyo xidhiidhka isaga iyo Qur'aanka Kariimka ah.



Gebileyna ka hirgelisay masaajidka Shariifah Suldaan Almiiftaax oo ku fadhiya dhul cabbirkiisu yahay 100 mitir laba jibbaaran, halkii marna ay ku tukaan karaan 120 qof.

Masaajiddadan ayaa loo dhammaystiray kaabayaasha aasaasiga ah ee ay ka mid yihiin, gogosha, cod baahiyeyaasha, qaybaha waysada iyo xamaamyada, iyo kutubta Qur'aanka Kariimka ah ee loogu talagalay in lagu akhriso.

Dhismaha masaajidkan ayaa qayb ka ah mashaariicda dhismaha xarumaha Islaamiga ah ee ay hay'adda ARC ka fuliso deegaannada kala duwan ee Soomaalida ee Geeska Afrika, waxaana maalgeliya hay'adda Caalamiga ah ee ALRAXMA – Kuweyt oo ay ARC ka wakiil tahay.

Arday Iyo Masuuliyiin Ka Tirsan Mashruuca Deegaanka Ee Hay'adda Candlelight Ayaa Booqasho Ku Yimid Beeraha ALRAXMA

18 arday iyo 5 macallin oo ka socda dugsiga sare ee Maxamed Mooge ee magaalada Hargeysa, ayaa booqasho aqoon iyo waayoaragnimo korodhsi ah ku yimid beerta ALRAXMA ee xarunta Kuweytiga magaalada Hargeysa. Ardaydan waxaa hormuud u ahaa Marwo Kawsar Muuse oo madax ka ah mashruuca ECO-School Project ee hay'adda Candlelight iyo Eliiga Mulumba, maamulaha qaybta mashaariicda ee hay'addaas.

Waftigan ardayda iyo masuuliyiinta ah waxaa beer ta ALRAXMA ku soo dhoweeyey Waa'il Al-subaaci, Kormeerka guud ee Beeraha ALRAXMA. Waxaa la soo mariyey qaybaha kala duwan ee beertu ka kooban tahay, iyada oo qayb kasta laga siinayey casharro iyo faahfaahinno la xidhiidha guud ahaan waxsoosaarka beertan iyo si gaar ah waxsoosaarkeeda khudradaha aan hore looga beeri jirin Somaliland ee ay beerta ALRAXMA soo kordhisay. Waxa kale oo warbixin laga siiyey deegaanka iyo xidhiidhka ka dhexeeya beeraha iyo isbeddelka cimilada.

Mashruuca Eco-Schools ee hay'adda Candlelight waxa ay ujeedadiisu tahay in ardayda la baro aqoonta, xirfadaha, dabecadaha iyo qiyamka lagama maarmaanka u ah daryeelka iyo horumarinta deegaanka oo ay beeruhu ka mid yihiin. Hay'adda ayaa dugsiga sare ee Maxamed Mooge u doortay in uu kala shaqeeyo mashruucan, iyada oo ardayda lagu dhiirrigelinayo dhowrista deegaanka, dhir beerista iyo in ay samaystaan beer-dugsigu leeyahay. Taas oo qayb ka ah dadaalka guud ee wacyigelinta



muhiimadda daryeelka deegaanku uu leeyahay iyo yaraynta dhibaataada isbeddelka cimilada.

Beerta ALRAXMA waxa ay ka mid tahay mashaariicda dhinaca beeraha ee ay hay'adda Gargaarka Afrika – ARC ka fuliso Somaliland, waxaana loogu talagalay waxbarashada beeraha, dhiirrigelinta beer falashada iyo in waxsoosaarka beerahan looga faa'iideeyo ardayda agoonta ah ee hay'addu ku daryeesho xarumaha Kuweytiga, kuwaas oo cunto ahaan u isticmaala waxsoosaarka, qaybaha ka soo hadhana suuqa la geeyo si dakhliga ka soo xarooda iyaga dib loogu celiyo.

Hawlwadeennada ARC Oo Yeeshay Kulan-Hawleed Lagu Dejinayey Qorshaha Istaraatijiyadeed Ee Sannadka 2023



Hawlwadeennada qaybaha iyo waaxyaha kala duwan ee hay'adda ARC ayaa isugu yimid kulan-hawleed lagu gorfaynayo qorshe istaraatijiyadeedka shaqo ee mashaariicda iyo Barnaamijyada hay'adda ARC ee sannadka 2023. Kulankan waxaa ka qaybgalay in ka badan 30 ka mid ah hawlwadeennada iyo masuuliyiinta hay'adda oo ay ku jiraan, maamulka xarunta dhexe iyo laamaha goballada, waaxyaha iyo xafiisyada hay'adda iyo maamulka cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa. Muddadii uu socdayna waxa ay yeesheen doodo, aragti wadaag iyo waayoaragnimo isdhaafsi ay ku lafagurayeen sida ugu habboon ee loo dejin karo qorshe hawleed ku aaddan hannaanka qaybinta iyo hawlgelinta cududda shaqaale iyo ilaha dhaqaale, si hay'addu ay u gaadho ujeedooyinkeeda Istaraatijiyadeed. Iyada oo sida oo kalana ahayd fursad hawlwadeennadani ay ku soo gudbiyeen guulaha shaqo iyo waayoaragnimada ay heleen, taas oo ka qaybqaadanaysa in la isku dhiirrigeliyo sii laban-laabista dadaallada lagu gaadhayo guusha, iyo horumarinta hawlgudashada hawlwadeennada iyo guud ahaan hay'adda.

Dr. Cabdiraxmaan Almucallimi, Guddoomiyaha guud ee hay'adda Gargaarka Afrika – ARC oo kulankan ka jeediyey hadal ku aaddan muhiimadda ay leedahay dejinta

qorsheyaasha shaqo ee mashaariicda iyo Barnaamijyada ay fuliso ARC, ayaa maamulka qaybaha kala duwan ku dhiirrigeliyey in xoogga la saaro dejinta qorsheyaal ku dhisan higsiiyo iyo himilooyin cadcad oo lagu gaadhi karo yoolalka la beegsanayo, iyada oo lala jaanqaadayo awoodda iyo kartida shaqo ee hawlwadeennada. Guddoomiyuhu waxa uu rajeyey in sannadka 2023 uu noqdo mid ka midho iyo guulo badan sannadkan 2022 oo qudhiisa ay hay'adda guulo badan ka gaadhay hawlaha samafal ee ay ka waddo Somaliland iyo guud ahaan deegaannada Soomaalida ee gobalka Geeska Afrika.

Waxaa isaguna kulankan hadal ka jeediyey Mudane Ciid Cabdalladiif, agaasimaha waaxda waxbarashada ee hay'adda ARC oo boorriyey in la badiyo kulamada lagu lafagurayo xoojinta hawlaha samafal ee socda iyo dhiirrigelinta iskaashiga hawlwadeennada, masuuliyiinta iyo waaxyaha kala duwan ee hay'adda. Dhinaca kalana waxa uu faahfaahino ka bixiyey muhiimadda uu qorshe hawleedku u leedahay shaqada.

Masuuliyiinta kale ee kulankan ka hadlay waxaa ka mid ahaa Dr. Mudahar Alqacaafi, agaasimaha maamulka ee cisbitaalka Caalamiga ah ee Hargeysa. Waxa aanu ka warramay qaybaha uu kulan hawleedkani ka kooban yahay, iyo sida oo kale khariiradda loo marayo diyaarinta qorshe hawleedkan, isaga oo soo jeediyey tilmaamo iyo talooyin caawinaya guud ahaan Istaraatijiyadaha hay'adda. Mudane Cabdiraxmaan Althaamir, agaasimaha mashaariicda ee ARC ayaa isaguna kulanka ku soo bandhigay, qorshe-hawleedyada labadii sanno ee la soo dhaafay ay ku soo shaqaysay waaxda mashaariicda iyo qaybaheeda kala duwani, iyo casharrada laga bartay meelaha uu u wanaagsanaa iyo galdaloolooyinka ka soo baxay. Waxa kale oo uu soo bandhigay soojeedimihisa la xidhiidha qorshe istaraatijiyadeedka sannadka soo socda ee 2023, iyo yoolashada ugu muhiimsan ee ay tahay in la beegsado.

Agaasimaha Waaxda Waxbarashada Ee ARC Oo Booqasho Shaqo Ku Tegey Boorama



ALNUUR mudane Cabdiraxmaan Alcamuudi, iyo tiro ka mid ah maa- mulka iyo macalli- miinta dugsiyada ALNUUR. Isaga oo dhinaca kalana masuuliyiintan ka dhegeystay warbi- xinno la xidhiidha hawlaha waxba- rashada, qorsha- yaasha horuma- rineed ee xafiiska uga dejisan wax-

qaybgalay xafladdaas, ayaa hadal uu ka jeediyey waxa uu masuuliyiinta xarunta ALNUUR iyo guud ahaan hay'adda ARC ee ay hoostagto uga mahadnaqay, kaalinta muuqata ee ay kaga jirto samafalka waxbarasha- da oo ay ka waddo guud ahaan ma- gaalooyinka iyo deegaannada kala duwan ee Somaliland. Kuwaas oo ay ka mid tahay xarunta ALNUUR oo uu sheegay in ay soo saarto xul ka mid ah aqoonyahanka gobalka.

Mudane Ciid oo isaguna munaasaba- dda hadal ka jeediyey ayaa masuuli- yiinta iyo hawlwadeennada waxba- rashada ee xarunta ALNUUR, waxa uu ku bogaadiyey dadaalka ay geli- yaan tayada iyo horumarinta adeeg- yada waxbarasho ee ay gobalka ka wadaan. Waxa aanu ardayda dug- siyada ALNUUR ku ammaanay, in ay sannadkan kaalinta koowaad u galeen dhammaan dugsiyada hoos taga hay'adda ARC oo ka wakiil ah hay'adda Caalamiga ah ee ALRAX- MA – Kuweyt.

Ugu dambayntiina ardayda kaalma- ha sare ka gashay imtixaankii qa- ranka, ayaa uu guddoonsiiyey abaal marinnno ay ka mid ahaayeen kombi- yuutarro 'Laptop' ah iyo 'Tablet-yo'

Agaasimaha waaxda waxbarashada iyo Barbaarinta ee hay'adda Gargaar- ra Afrika – ARC, mudane Ciid Mu- xamed Cabdalladiif ayaa booqasho shaqo ku tegey xarunta waxbarasha- da ee ALNUUR ee magaalada Boor- ama oo hoos timaadda hay'adda. Ujeeddada safarka agaasimaha ayaa ahayd u kuurgelista habsami u soco- dka hawlaha waxbarasho ee dugsiya- da ALNUUR ee magaaladaas.

Agaasimaha waxaa xarunta ku soo dhoweeyey masuuliyiin ay ka mid yihiin, kormeeraha guud ee xafiis- ka Boorama Mudane Cabdalqaadir, maamulaha xarunta waxbarashada

barashada, iyo baahiyaha tababarra- da lagu xoojinayo tayada adeegyada waxbarasho ee ay xarunta ALNUUR siiso ardayda.

Agaasime Ciid Cabdalladiif mudda- dii uu booqashadan ku guda jiray waxa uu ka qaybgalay xaflad lagu abaalmarinayey ardaydii fasallada Siddeedaad ee dugsiga dhexe iyo Afaraad ee dugsiga sare ee dugsiyada ALNUUR kaalmaha sare uga gashay, imtixaanaadkii qaranka ee sannad dugsiiyeedkii 2021-2022.

Isu-duwaha wasaaradda waxbarashada iyo sayniska ee gobalka Awdal oo ka mid ahaa masuuliyiinta ka

Tartanka Qurxinta Fasalka Ee Dugsiyada Xarunta Waxbarashada Kuweytiga

Dugsiyada Xarunta waxbarashada ee Kuweytiga, waxaa ka qabsoomay tartankii sannadlaha ahaa ee qurxinta fasallada waxbarashada. Ardayda fasallada kala duwan ayaa sannad kasta ku tartama qurxinta fasalladooda iya- ga oo ka duulayaa aqoonta ay sannad kasta korodhsaa- daan ee dhinaca Barbaarinta iyo xoojinta qiyamkooda, si loogu dhiirrigeliyo in ay gutaan xilka bulsho ee saaran. Ardayda ayaa samaysa nashqado iyo dhismeyaal kar- toonno ka samaysan oo ah saamballada xarumaha wax- barashada, agab macallimiinta iyo ardaydaba u fududay- naya hawlaha fasallada dhexdooda iyo bannaankoodaba, iyo sida oo kale hal-abuurro kala duwan oo ah qurxinta iyo wanaajinta muuqaalka fasallada. Fasal kasta arday- diisa ayaa qabta hawlaha qurxinta, kaddibna guddi ka socota maamulka qaybaha kala duwan ee waxbarasha- da iyo macallimiin ayaa ka qayb qaadata qiimaynta iyo kala xulista fasalladan, si loo soo saaro fasalka ugu fiican uguna quruxda badan. Kaas ayaana loo aqoosadaa in uu yahay fasalka sannadkaas koobka u qaaday tartanka qur- xinta fasallada.



Ujeeddada weyn ee tartankanina waa in kor loo qaado dareenka hal-abuur ee ardayda, laguna beero ruux ogol in wanaagga lagu tartamo.





kaashiga togan, waxa aanay inoo diidaysaa is-garabsiga taban, 'Isu kaashada samaha iyo Alle ka cab-siga, laakiin ha isu kaashanina gefka iyo xad gudubka'. Nebi Muxamed (SCW) ayaa isaguna isla arrintaas sii adkaynaya, "Qofka Alle rumeeeyey (Muuminku), Qofka kale ee Ilaahay rumaysan waxa ay isku yihiin sida dhismaha, qaybiba ay qaybta kale adkayso, kuna tiirsantahay" ayaa laga soo weriyey.

dhex abuuraa shaqaalaha dhexdooda, shaqaalaha iyo maamulladooda kala sarreeya iyo shaqaalaha iyo hay'adda qudheeda.

Maamulaha guulaystaa, qof kasta oo shaqaalihisa ka mid ah waa uu bartaa; dhinaciisa togan waa uu xoojiyaa, shaqadana uga faa'ideeyaa. Dhinaciisa tabanna waa uu daweeyo, inta aanu sooba shaac bixin ayaanu ka hortagaa si aanu shaqada khasaare u gaadhsiin.

Marka uu abuurmo qiyamkaas ku dhisan isdhexgalka, xilkasnimada, niyadsamaanta iyo kartida uu hawlwadeenku u leeyahay shaqada loo igmanayo, isla markaana uu yoolka hay'addu noqdo mid aanu madow ku jirin, waxaa fududaata shaqada, waxaana si dhib yar u rumowda riyada hay'adda, taas lidkeedu se waa burburka hay'adda ama ururka.

Hoggaamiyuhu si uu isugu dubariddo, una xoojiyo tamarta iyo awoodda shaqaalaha, waa in uu joogteeyo dadaal kasta oo lagu dhisayo kartida, aqoonta iyo niyadda shaqaalaha, laguna xoojinayo kalgacalka iyo dareenka lahaanshiyo ee ay shaqada / hay'adda u qabaan. Waa in uu ku dhac u yeesho shaqo daadajinta, kuna dhiirran karo igmashada shaqaalihisa kartida leh. Sida oo kale waa in uu dadaalgeliyo godlinta maskaxda shaqaalaha, si looga helo afkaarta iyo hal-abuurrada ka dhex guuxaya ee shaqada danta u ah, iyo in ay si niyadsamaan ah wanaagga iyo horumarka ugu loollamaan, taas ayaa hay'ad kastaba ku hagi karta guusha.

Maamul karti, aqoon iyo waayoaragnimo leh, aan kor fadhiyin shaqaalaha ee dhex fadhiyay, iyo nidaam maamul oo leh qiyamka aynu ka warannay ayaa curin kara ruux hal-abuur iyo hindiseyaal hay'adda ku hagi kara yoolkeeda. "Wadajirbay laba gacmood wax ku gooyaan"

Waxyaabaha aadamuhu uu bilowgii hore ee noloshiisaba fahmay waxaa ka mid ah, in shaqada oo la isu kaashado iyo wadajirku ay tahay habka ugu habboon ee looga midha dhalin karo nolosha guusheeda, fududayna kara in la gaadho higsiga laga leeyahay shaqada.

Wadajirku waa tiir dhexaadka qiyamka laga rabo maamulka iyo Maaraynta, waana jidka fududeeya in yoolka la gaadho.

Nolosha ayaa ina baraysa ka maarmi waaga isgarabsiga iyo shaqo-wadareedda, waayoaragnimaduna waxa ay ina tusaysaa in kala taggu uu yahay liidasho iyo taagdarro. Laakiin, ma'aha arrin keliya noloshu ina bartay, balse waa qayb abuurteenna ka mid ah oo Alle innagu beeray, innaguna dhiirrigeliyey.

Aayadda labaad ee suuratul-maa'ida, waxa ay innagu dhiirrigelinaysaa is-

Shaqo kasta oo shirkadeed ama hay'adeed iyo urur, waxa ay leedahay higsiga iyo himilo la doonayo in laga gaadho, haddii kale ma'aha shaqo jirta. Waayoaragnimaduna waxa ay ina baraysaa in jidka keliya ee guushaas lagu gaadhi karaa uu yahay isgarabsiinta, iyo wadajir ka dhex abuurma shaqo wadaagta, taas oo la waayaana ay tahay guuldarro.

Iskaashigu waxa uu ka soo bilowdaa halka ugu sarraysa oo ah maamulka, hoggaanka hay'adda, maamulka shaqada iyo kormeerka kooxda shaqo ayaa laga rabaa, in ay abuuraan jawi, iyo deegaan dhiirrigelinaya qiyam ku dhisan iskaashi iyo shaqo wadareed oo gaadha illaa halka ugu hoosaysa jaranjarrada maamulka.

Haddaba, hoggaanka iyo madaxda guulaystaa waa kan awoodi kara in uu dhiso wadar leh dhaqan iskaashi iyo wadajir, waxa uu kalsooni ka



**Wada Jirbay Laba
Gacmood Wax Ku
Gooyaan**



لجنة أفريقيًا للإغاثة
AFRICAN RELIEF COMMITTEE

أثر .. يبقى

[Twitter](#) [Facebook](#) [YouTube](#) [Instagram](#) @africanreliefco

مسارات
خيرية CHARITABLE
PATHS